

## **Tallaalidda dhallinyarada oo la soo hormarinayo**

**Dawladdu waxa ay wax ka beddelaysa istiraatiijiyadda tallaalka si dhallinyarada ka weyn 18 sanno loo siiyo tallaalka, kaddib marka la tallaallo dhammaan dadka ka weyn 45 sanno. Waxa kale oo laga fekerayaa in tallaalka loo badiyo degmooyinka faafidda cudurku weli ku badan tahay.**

- Tallaalku waxa uu ka mid yahay waxyaalaha ugu muhiimsan ee lagu dagaallamayo fayruska koroonaha. Tallaalidda ayaa ah xalka lagu soo ceshan karo noloshii caadiga ahayd islamarkaana lagu heli lahaa xorriyad inta hadda ka badan. Waa aan ku faraxsanahay in dadweynaha Norway si balaadhan u taageersan yahay barnaamijka tallaalka. 1,5 milyan dadweynaha Norway ayaa ilaa hadda qaatay tallaalka. Ku dhawaad boqolkiiba 90 ayaa hadda la tallaallay dadka ugu waaweyn ee mudnaanta la siinayey ilaa hadda, ayay tidhi raysalwaaare Erna Solberg.

## **Tallaalidda dhallinyarada ayaa la soo hormarinayaa**

Dawladdu waxa ay Machadka Caafimaadka Dadweynaha u xilsaartay in ay eegto in kor loo qaadi karo mudnaansiinta dhallinyarada, waxaanay go'aamisay in wax laga beddelo sida loo kala horraynayo safka tallaalka kaddib marka dhammaan dadka ka weyn 45 sanno la siiyo fursadda is tallaalidda. Markaa ayaa dadka da'doodu tahay 18-24 sanno iyo 40-44 sanno isla hal mar la siinayaa fursadda is tallaalidda. Kaddibna dadka dad'doodu tahay 25-39 sanno ayaa la siinayaa fursadda is tallaalidda. Arrintani waxa ay waafaqsan tahay soo jeedinnada Machadka Caafimaadka Dadweynaha. Guddiga Vorland ayaa isaguna soo jeediyay in kor loo qaado mudnaansiinta dhallinyarada. Xilliga tallaalidda dhallinyarada laga bilaabay degmooyinka farqi ayaa u dhaxayn doona, laakiin degmooyin ayaa durba bilowga bisha Juun bilaabi doona hawsha.

- Dawladdu waxa ay mar kastaba, muddadii cudurka safmarka ah socday, mudnaanta siinaysay carruurta iyo dhallinyarada. Inkastoo aannu isku daynay in aannu dhibta soo gaadhaysa yarayno ilaa inta suurtaggalka ah, haddana carruur iyo dhallinyaro badan ayaa dhib weyni ka soo gaadhay tallaabooyinkii la soo rogay. In carruurta ay dadka kale la yeelato xidhiidh inta hadda ka badan islamarkaana hesho nolol ka xorriyad badan sida hadda ayaa aad u muhiim ah, isla markaana soo hormarinta tallaalidda dhallinyarada ayaa gacan ka geysanaysa yaraynta faafidda cudurka, ayay tidhi Solberg.

## **Waxa la kordhin karaa heerka degmooyinka loogu kala badinayo tallaalka**

Maanta degmooyinka Moss, Sarpsborg, Fredrikstad, Lørenskog iyo Oslo waxa ay helaan tallaalka boqolkiiba 20 ka badan inta ay helaan degmooyinka kale ee waddanku. Machadka Caafimaadka Dadweynaha waxa uu hadda soo jeediyay in tirada tallaalka loo kordhiyo 24 degmooyin oo bariga ka tirsan oo faafidda cudurku ku badnayd muddo dheer. Waxa ay soo jeediyeen in degmooyinkaas la siiyo tallaalka boqolkiiba 80 ka badan intii ay heli lahaayeen caadi ahaan, ilaa iyo inta dhammaan dadka ka weyn 18 sanno ay qaadanayaan tallaalka koowaad.

Dawladdu si weyn ayay u rabtaa in ay raacdo talada ku saabsan in la sii kordhiyo nidaamka tallaalka loogu kala badinayo degmooyinka. Machadka Caafimaadka Dadweynaha waxa uu gartay in marka boqolkiiba 60 ama 80 tallaalka loo kordhiyo 24 degmooyin ee bariga ku yaalla, ay faa'idada laga helayo isku mid tahay. Dawladdu waxa ay dooratay in boqolkiiba 60 tallaalka loo kordhiyo degmooyinka faafidda cudurku ku badnaa muddo dheer. Waxa ay taasi yaraynaysaa cadaadiska ku imanaya degmooyinka kale bisha Julaay.

- Go'aanka dawladda waxa lagu saleeyey labo shuruud oo muhiim ah: Waa in la hubsado in degmooyinka tallaalka laga yareeyey bilaha Juun iyo bilowga Julaay ay awoodi karaan in ay tallaalidii dhaaftay ka gaadhsiiin karaan dhammaadka bisha Julaay. Annaga iyo gudoomiyaha gobolka ayaa wadahadal la yeelan doonna degmooyinka si loogu kuurgalo in hawlaha tallaalidu sidii la rabay u socon karaan bisha fasaxa la yahay ee Julaay. Haddii wax laga beddelayo qaybinta tallaalka, waa in marka hore la hubsado in arrintaasi ay wax dib-u-dhac ah ku keenayn xilliga la rabo dadka oo dhan ay qaateen tallaalka, ayay tidhi raysalwasaare Erna Solberg.

Dawladdu waxa kale oo ay Machadka Caafimaadka Dadweynaha iyo Agaasinka Caafimaadka ka codsatay in ay qiimayn degdeg ah ku sameeyaan in wax laga beddelayo liiska ka kooban degmooyinka loo kordhinayo ama laga yaraynayo tallaalka marka la eego is beddelladii dhacay muddadii ka dambaysay markii liiska la sameeyay, iyo dillaacitaannada cudurka ee socda.

24 degmooyin ee ku jira liiska waxa in muddo ah ku badnaa faafidda cudurka, laakiin waa in la eego in ay jiraan degmooyin kale oo faafidda cudurku ku badan tahay oo u baahan in mudnaanta la siiyo ama laga dhigo kuwo dhexdhexaad ah oo aan markaa laga yaraynin tirada tallaalka.

Soo jeedinta Machadka Caafimaadka Dadweynaha waxa ay ka dhigan tahay in 319 degmooyin ay helayaan tallaalka ku dhawaad boqolkiiba 35 ka yar inta heli lahaayeen marka la eego tirada dadka ku nool degmadooda, oo ay sidaas ahaanayso muddo ilaa 7 toddobaad ah. Tirada dadka ku nool degmooyinkaasi waa ku dhawaad kala badh dadka ku nool Norway. 13 degmooyin ayaan wax laga beddeli doonin tirada tallaalkooda.

Marka habkan loo qaybinayo tallaalka waxa lagu xisaabtamaya in degmooyinka tallaalka laga yareeyay Juun iyo bilowga Julaay, ay awoodi karaan in ay tallaallaan dad ka badan intii ay ku talogaleen qaybta dambe ee Julaay.

Nidaamka cusub ee qaybinta tallaalka waxa la bilaabi karaa ugu horreyn toddobaadka 23.

- Faa'idada ku jirta in tallaalka intii hore looga badiyo degmooyinka cudurku ku badan yahay ayaa ah in dadka ku nool degmooyinkaasi ay tallaalka koowaad u heli doonaan si ka dhakhso badan sidii hore. Waxa kale oo ka dhalan kara in xilli hore la

debcin karo tallaabooyinka muddo aad u dheer ka jiray degmooyinkaas, oo markaana waddanka oo dhan hal mar la wada furo, ayuu yidhi Høie.

Maadaama faafidda cudurku ku badan tahay xaafadaha qaar isla markaana degmada lagu soo rogay tallabooyin heerkoodu sarreeyo, waxa Oslo fursad u helaysaa in ay xaafaddo mudnaanta la siiyay ka bilowdo tallaalidda dadka ka yar 45 sanno, kaddib marka dhammaan dadka ka weyn 45 sano ee deggan xaafadahaasi ay fursad u heleen in ay qaataan tallaalka.

### **Ma jiraan dad shaqooyin gaar ah haya oo loo hormarinayo tallaalka**

Machadka Caafimaadka Dadweynaha wuxu soo jeedinayaa in aan mudnaanta tallaalidda la siinin dad ka shaqeeya shaqooyin gaar ah ama dadka haya shaqooyinka lagama maarmaanka u ah bulshada. Dawladdu waxa ay raacday soo jeedintaas.

Machadku waxa uu aaminsan yahay in haddii mudnaanta la siiyo dadka haya shaqooyinka lagama maarmaanka u ah bulshada ee aan ahayn shaqaale caafimaad, uu culays shaqo oo dheeraad ah ku iman doono degmooyinka iyadoo aan haddana wax weyn ku soo biirin doonin dedejinta hawlaha tallaalida.

### **XOG:**

Degmooyinkan ayaa heli doona tallaalo dheeraad ah marka la raaco soo jeedinta Machadka Caafimaadka Dadweynaha (waxa dhici karta in is beddel yimaado):

- Asker
- Bærum
- Drammen
- Eidsvoll
- Enebakk
- Fredrikstad (maanta waxay heshaa in boqolkiiba 20 ka badan inta uga soo bixi lahayd qaacidada qaybinta ee asaasiga ah)
- Frogn
- Gjerdrum
- Halden
- Indre Østfold
- Lier
- Lillestrøm
- Lørenskog (maanta waxay heshaa in boqolkiiba 20 ka badan inta uga soo bixi lahayd qaacidada qaybinta ee asaasiga ah)
- Moss (maanta waxay heshaa in boqolkiiba 20 ka badan inta uga soo bixi lahayd qaacidada qaybinta ee asaasiga ah)
- Nannestad
- Nittedal
- Nordre Follo
- Oslo (maanta waxay heshaa in boqolkiiba 20 ka badan inta uga soo bixi lahayd qaacidada qaybinta ee asaasiga ah)

- Rælingen
- Råde
- Sarpsborg (maanta waxay heshaa in boqolkiiba 20 ka badan inta uga soo bixi lahayd qaacidada qaybinta ee asaasiga ah)
- Ullensaker
- Vestby
- Ås

Degmooyinkan ayaa heli doona tiro tallaal oo la mid ah sidii hore marka la raaco soo jeedinta Machadka Caafimaadka Dadweynaha (waxa dhici karta in is beddel yimaado):

- Bergen
- Førde
- Hamar
- Kongsvinger
- Kristiansand
- Larvik
- Nes
- Ringerike
- Ringsaker
- Sandnes
- Skien
- Stavanger
- Trondheim

Waddanka degmooyinkiisa kale oo ah 319 ayaa laga yaraynayaa tallaalka.